



(Inaan iraaqdo: subxaana Allaahi, wal-xamdu lillaahi, walaq ilaaha ilaa-Ilaahu, wallaahu akbar, ayaan ka jeclahay inta qoraxdu u soo baxdo oo dhan

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Inaan iraaqdo: subxaana Allaahi, wal-xamdu lillaahi, walaq ilaaha ilaa-Ilaahu, wallaahu akbar, ayaan ka jeclahay inta qoraxdu u soo baxdo oo dhan.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Rasuulku scw wuxuu sheegay in dikriga Ilaahay ee ereyadaan waawayn ah ay ka khayr badan yihiin aduunyada iyo waxa dhex yaalla, oo ah: (Subxaana Allaah) Ilaahay Isagaa nusqaan oo dhan ka hufan. (Alxamdu lillaahi) Ilaahay Isagaa ku amaanan sifaadkiisa kaamilka ah oo maxabadiisa iyo waynaantiisu la jirto. (Laa ilaaha Ilaa Allaah) ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan Ilaahay ahayn. (Allaahu akbar) Ilaahay ayaa wax walba ka wayn.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6211>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

